# XAASHIDA XAQIIQDA # 7
# MIDIBEYNTA SABOOLNIMADA EE CADDAALADA IYO BOOLISKA

Sidee dadka midab kala sooca ahi ugu liidan yihiin caddalada iyo booliska?

**Faaqidaad**

Laga soo bilaabo 2013ki ilaa 2015ki adeegyada booliska Ottawa waxay ogaadeen in darawalada madowga la joogiyey 2.3 jeer in ka badan inta la filaayay marka loo eego matalaadda dadka wadista, niman dhallinyaro ah oo madow ayaa la joojiyay ilaa iyo 8.3 jeer in ka badan; sidoo kale darawalada bariga dhexe ayaa la joojiyey 3.3 jeer in ka badan; iyo ragga dhalinyarada ah ee bariga dhexe ayaa ayagana la joojiyay 12 jeer in ka badan.

**Xariga maxkamada ka hor**

warbixin 2016ka oo ku saabsan nidaamka damiinashada ee gobalka Ontaariyo ayaa lagu ogaaday in dadka asaliga ah iyo dadka midabka leh kuwaas oo ay ku qasban yihiin wax qabashada howlaha boolisnimada iyo ku takri falka isirka iyo midab kala sooca ayay u badan tahay in ay ku helaan xabsi maxkamada ka hor.

**Kala Saarid:**

2016ka, boqolkiiba 40 maxaabiista lagu kala soocay xabsiga Koonfurta ee Toronto waxay ahaayeen madow. Halka boqolkiiba ay ka ahaayeen 7.5 tirakoobka Toronto ee maga-alooyinka waaweyn.

Warbixinada dawladda ee ku saabsan amniga qaranka waxay si gaar ah diiradda u saareysaa shakhsiyaadka muslimiinta ah iyo ururada oo ah isha argagqixisada iyaga oo iska indhotiraya halista dhabta ah ee in ka badan 100 garabka midig iyo kooxaha caddaanka ah ee ka firfircoon guud ahaan Kanada.

**Heerka Xiritaanka:**

Natiijooyinka heerka sare ee barista marka la bar-bar dhigo dadka caddaanka ah, dadka laga tira badan yahay waxay u badan tahay in la qabto, la xukumo, oo la ciqaabo, taa soo loo aqoonsaday in ay qayb weyn ka qaadatay soo gudbinta ragga madow ee ku aadan dembiyada iyo nidaamka caddaaladda.

**Xabsi Guri:** Sanadkii 2016kii, dadka madowga ah waxay ka koobnaayeen boqolkiiba 3.5 tirada guud ee dadka Kanada, laakiin waxay noqdeen boqolkii 10 tirada dadka u xiran federalka.

**Diirad Gelinta Dadka Asaliga ah**

Booliska Royal Canadian Mounted Police (RCMP) ayaa qiray warbixnitii 2014ka in ay jiraan ku dhawaad 1200 oo la la'yahay laguna dilay haween asal ahaan ka soo jeeda Kanada intu u dhaxeysay 1980kii iyo 2012kii. Kooxaha haweenka asaliga ah si kastaba ha ahaatee waxay diiwaan gelinayaan tirade la la'yahay ee la dilay in ka badan 4,000 (Afarkun).

Haweenka asaliga ah ee jira 15 sano iyo wixii ka weyn waxay 3.5 jeer ka badan tahay in aay la kulmaan rabshado ka badan haweenka aan asaliga ahayn, sida lagu sheegay sahanka guud ee bulshada 2004.

Sanadkii 2016ka heerka dilka ee haweenka asaliga wuxuu 5 jeer ka badan yahay dumarka aan asaliga ahayn. Boqolkiiba 14 dadka kalal saarka ku jira xabsiyada Ontaariyo waa asal. Inka badan kala bar haweenka asaliga ah iyo ragga loo ogolaaday kala soocidda 2016ka ayaa lahaa digniin ama feejignaanta khatarta isdilka. Marka la eego warbixinta RCMP in ka badan boqolkiiba 90 dhibanayaasha tahriibka waa muwaadin Kanadiaan ah; boqolkiiba 92 dhibanayaasha waxaa looga ganacsadaa ulajeedooyinka kafaa'iideysiga galmada. Badanaa dhibaneyaasha ka ganacsiga tahriibka Kanada waa dad asali ah, badankooduna waa dhalinyaro.

Sanadkii 2016ka, wadarta guud ee dadweynaha xiran waa boqolkiiba 25 iyo boqolkiiba 35 waa dumarka ay xukuntay federaalka waxay na ahaayeen asal ahaan, inkasta oo ay ku xisaab-tameen kaliya boqolkii 4.3 tirada guud ee dadka Kanada. Intii u dhaxeysay 2005ta iyo 2015ka, tirade dadka asaliga ah ee xiran ayaa kordhay in ka badan boqolkiiba 50, halka tirade dumarka asaliga ah ee xiran oo ay ku dhawaad labanlaabantahay.

**Khatar:**
Bulshooyinka isir raaca ah ayaa si aad ah loogu hadal hayaa dadka dakhligooda hooseeyo waxaana soo food saartay halis aad u sarreyso hoy la'aan, xabsi iyo ku xadgudubka xuquuqda aadanaha. Tani waxay kordhineysaa suuragalni-mada ah in si xad dhaaf ah loo ilaaliyo halka ay yareynayso helitaankooda iyo caddaladda iyo amniga.

**Marin:**
Helitaanka cadaalada, iyo metalaad caadil ah oo loo helo shaqsiyaadka midabtakoorka maxkamadaha ka hor, guddiga maamulka iyo marin u helista gargaarka sharciga ayaa aad uga sii adkaatay maxaa yeelay jinsiyadooda iyo xaaladda socdaalka ee dhinca kale, shaqo la'aanta iyo Jawaab celin luqadeed, iyo adeegyo aamin ah oo nidaamka caddaaladda dhan ka kale.

**Dembi-Falka:**
Nidaamka damiinashada Kanadiyaanka waa midka si aan toos ahayn u ciqaabo oo danbiga u gala. Saboolnimo; balwada iyo jirrada maskaxda oo sii xumaaneysa sinnan la'aanta ka timid midabtakoor

## Qoraalo DegDeg Ah!

Markaan tixraacno dadka midabka leh waxaan u hadalnaa dadka reer Kanada ee asal ahaan aan yurub ka soo jeedin ama dhaxalkaba – labadaba dadka midabka leh ee u dhashay Kanada iyo sidoo kale kuwa ku dhashay meel kale.
Markaan tixraacno dadka asaliga ah, waxaan u hadleynaa shaqsiyaadka ummadda koowaad ee Inuit iyo Metis.
Magaalada Toronto, boqolkiiba 62 dadka ku nool saboolnimada waxay ka soo jeedaan kooxo isir-raac ah.
Boqolkii 52 dadka midabtakoorka Kanada ee ku nool saboolnimada waxay ku nool yihiin Ontaariyo.
Reeraha hoos taga dakhligoodu hooseeyo ee Kanada (LICO) ama cabirka (LIM), waxay ku bixiyaan boqolkiiba in aad u badan dakhligooda daruuriga aasaasiga ah sida cuntada iyo hoyga marka loo eego qoyska caadiga ah; sidan ayaan u cabbirnaa saboolnimada

Midab-kala sooca habbeysan ayaa badanaa keena xaqiraad hay'ad qarsoon oo ku saabsan siyaasadaha, dhaqannada iyo habraacayada mudnaanta u leh ama u faa'iido darro u noqon kara koox dad ah. Waxay noqon kartaa natiijada ka soo baxda sida wax loo sameeyo mar walba iyada oo aan la tixgelinaynin kooxo gaar ah si ka duwan sidii hore.

Kanada gudaheeda, 2014kii waxaa jiray 611 dambi oo ay kicinayeen nacayb ka soo horjeeda cunsuriyadda gaarka ah (ugu horreyntii midab takoorka madow; 238), iyo 429 oo ay kicisay nacayb ka soo horjeeda koox diimeed gaar ah (ugu horreyn yuhuud: 213, iyo Muslim: 99). Dambiyo nacaybka ka dhanka ah muslimiinta waa la labanlaabatay inta u dhexeysay 2014kii iyo 2016kii.

Si kastaba ha noqatee, tirakoobyadan ayaan dhamey-stirnayn sababtoo ah qeyb yar oo falalka nacaybka ah ayaa la soo sheegay, si nidaamsan ayaa loo duubbay oo loola socdaa. Sanadkii 2013ka, qaybta 13aad ee sharciga xaquuqda aadamiga Kanada, kaaso saameeyay xiriirinta farriimaha nacaybka ee ku salaysan sharciga cabashada, waxaa baabi 'iyay dawladda muxaafidka. Tani waxay hoose u dhigtay fursadihii laga hali lahaa Kanada ee wax ka qabashada nacaybka iyada oo loo marayo nidaamka xuquuqul insaanka.

Laga soo bilaabo 2015kii, Thunder Bay, Ontaariyo, waxay la kuluntay tirada ugu badan ee dambiyada nacaybka ee la soo sheegay ee Kanada (ku dhawaad kala bar beegsashada dadka asaliga ah).

## Maxaa La Qabtay?

Adeegyada sharciga Aboriginal (Asaliga) ayaa ku takhasusay wakiilnimada sharci ee dadka asaliga ah ee ka soo jeeda Ontaariyo oo dhan isla markaana leh mid ka mid ah barnaamijyadan ugu ballaaran ee asalka Kanada.

www.aboriginallegal.ca/ info@aboriginallegal.ca
Guddiga xuquuqda Aadamiga Ontaariyo (OHRC) wuxuu ka shaqeeyaa abuurista dhaqan u hog-gaansanaanta xuquuqda aadanaha iyo isla xisaabtanka.

Isagoo kashifaya, loolan iyo soo afjarid dhismayaasha murugsan iyo nidaamyada baahsan ee takooridda iyadoo loo marayo waxbarasho, horumarinta siyaasadda, weydiimaha dadweynaha iyo dacwadda.

www.ohrc.on.ca/ info@ohrc.on.ca

Golaha qoranka ee muslimiinta Kanada (NCCM) waxay ku doodayaan iyaga oo matalaya kuwa la kulmay takoorid ka soo horjeedka Muslimka, nacaybka ama eexda, waxayna diiwaangeliyaan takoorka ka soo horjeeda Muslimka, dhibaataynta, ama dambiyo nacaybka.
www.nccm.ca/ info@nccm.ca